



## Liiska Hubinta Daryeelka Neefta Kalkaaliyaha Dugsiga (National Association of School Nurses)\*

### Qiimeyn

- Dib u eeg foomka qaadashada/diwaangelinta si aad u aqoonsato ardayda neefta qaba.
- La xidhiidh daryeel bixiye si aad u hesho maclumaad dheeraad ah, taariikhda ardayga, kiciyeaasha, welwelka daryeelah, foomka siidaynta caafimaadka, iyo bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP)/maclumaadka xiriirka khabiir daryeelka neefta ah (ACS).
- Qiimee baahiyaha dhaqaale, iyo luqadda ama aaminaadaha dhaqanka.
- La xidhiidh PCP/ACS si loo ansixyo ogaanshaha caafimaad oo aad u hesho liiska daawooyinka hadda jira, daawaynta, iwm.
- Qiimee aqoonta ardayga, awoodda is-maareynta, iyadoo la tixgelinayo luqadda iyo baahiyaha korriinka.
- Ururi xogta asaasiga ah ee ardayga; sida booqashadii ugu dambeysay ee PCP/ACS, ka darnaanta, booqashooyinka isbitaalka/ED, astaamaha muhiimka ah, isticmaalka qalabka neefsashada, soo xaadiritaanka.
- Qiimee haddii kiciyeaasha gaarka ah ay dugsiga ka jiraan ardayda hadda la aqoonsan yahay jirradooda.

### Cilad sheegida

- Samee baadhitaano kalkaalintaa caafimaad oo ku salaysan xogta qiimaynta.

### Natiijada

- Aqoonso hadafyada iyo natijjooyinka gaaban, dhewe iyo kuwa mudada dheer ee ku haboon ardayga, daryeel bixiyaha, iyo PCP/ACS.
- Natijjooyinka waa inay ahaadaan kuwo la qiyaasi karo oo ay ku jiraan muddo waqtii ah oo la filayo. Wuxuu ku jiri kara tacliin, nafsiyadda-bulsheed, tayada nolosha, caafimaadka.

### Qorshaynta

- Hubi in arday kastaa haysto Qorshaha Wax Ka Qabashada Neefta (AAP) hadda (12 bilood gudahood) si uu u maareeyo ka sii daridda xad dhaafka ah.
- Marka lagu daro AAP, samee, haddii loo baahdo, qorshe daryeel caafimaad oo shaqsiyeed (IHP) oo ku salaysan caddaynta iyada oo lala xiriirinayo ardayga, qoyska, iyo shaqaalaha dugsiga ee u baahan inay ogaadaan. IHP waa in ay horumarisaa sii wadida, noqotaa dhaqan ahaan xasaasi, oo ay ku jirto istiraatijiyad lagu qiimaynayo.
- Samee qorshe xaaladaha degdega ah/masiibooyinka ah, safarada dibadda iyo marka kalkaalisaada dugsiga la waayo.
- Ka qaybqaado IEP ama nidaamka 504 haddii fudaydino loo baahan yahay.

### Fulinta

- Dhammaystir falalka sida lagu qexay AAP iyo IHP, oo ay ku jiraan: Daryeelka taxanaha ah, isuduwidda daryeelka, baridda caafimaadka, horumarinta caafimaadka, la tashiga, isgaarsiinta, iyo dokumentiyada.
- Hubi in agabka la siiyay macalimiinta iyo shaqaalaha kale ay u qornaayeen si ku habboon dhagaystayaasha.

### Qiimeynata

- Si joogto ah u qiimee si aad u go'aamiso haddii yoolalka kalkaalinta iyo natijjooyinka ardayga la gaaray.
- Si joogto ah oo aan is daba socod ahayn u qiimee qorshaha, oo ay ku jiraan waxa si wanaagsan u socda, caqabadaha, welwelka, iyo waxa uu ardayga/daryeelah/shaqaalaha jecel yahay in la beddelo.
- Qiimaynta shaqaalaha taageerada dugsiga ee loogu talagalay baahiyaha waxbarasho ee dheeraadka ah.
- Wax ka qabo baahiyaha shucuureed, dhaqan, korriin iyo luqadeed,
- Qiimee u hoggaansanaanta ardayga qorshaha mar kasta oo uu booqdo kalkaalisaada dugsiga.
- Dib-u-eeg qorshaha iyo fulinta daryeelka si waafaqsan jawaabta natijjooyinka qiimeynata si loo hagaajiyo natijjooyinka.
- Ugu yaraan hal mar sannadkii, dib u eeg saamaynta guud ee qorshaha iyo isbeddel kasta oo loo baahan yahay iyadoo lala kaashanayo ardayga.

\*[https://www.nasn.org/portals/0/resources/2015\\_asthma\\_care\\_checklist.pdf](https://www.nasn.org/portals/0/resources/2015_asthma_care_checklist.pdf)